

Shuruudaha gelitaanka PK-5 ee Emerson, Green, iyo Sheridan Dugsiyada Isbaanishka Labada Luuqadood

Maxay yihiin ujeedooyinka loogu talagalay Barnaamijyada labada luuqadood / barnaamijyada labo luuqadlaha?

Hadafkeenu waa in dhammaan ardayda ku jira fasalada Isbaanishka Labada Luuqadood /iyo Barnaamijyada laba luuqadlaha ardaydaas waa inay noqdaan laba-aqoonle iyo laba-luqadle Ingiriiska iyo Isbaanishka dhammaadka sannadka fasalka shanaad. Si loo gaaro himiladaan, waxaa lagu darayaa aagagga maadooyinka sida xisaabta, cilmiga bulshada, akhris-qorista, sayniska iyo takhasusleyda waxaa wax lagu barayaa ugu horreyn Isbaanishka fasalada PK-2, ka dibna si tartiib tartiib ah ayaa lagu darayaa Ingiriis fasallada 3-5

	K-1 LOTE: 80-90% English: 10-20%	2 LOTE: 70-80% English: 20-30%	3 LOTE: 60-70% English: 30-40%	4-5 LOTE: 50-60% English: 40-50%	
10%					100%
20%					90%
30%					80%
40%					70%
50%					60%
60%					50%
70%					40%
80%					30%
90%					20%
100%					10%

Maxay u jiraan shuruudaha gelitaanka iskuulka ee gaarka ah Barnaamijyada Labada Luuqadlaha? ?

Si aan u taageerno yoolalkayaga dhammaan ardayda laba-luqadlayaasha inay aqriyaan oo ay qoraan, luqadda aasaasiga ah iyo waxqabadyada akhris-qorista ee Isbaanishka waa in lagu daro aasaaska fasallada hore (K-2). Intaas waxaa sii dheer, maaddaama inta badan barashada maadada lagu sameeyo Isbaanish, waxaa muhiim ah in ardaydu ay yeeshaan garasho horumarineed oo xagga luqadda ah si ay u bartaan tasmada casharada

Maxaan uga jeednaa luqadda guriga?

Markii ay soo galayaan ardayda dugsi kasta oo Minnesota ah, qoysaska oo dhan waxaa looga baahan yahay inay dhammaystiraan Sahanka Luqadda Guriga ee Minnesota. Xog uruurintaan waxaa loola jeedaa in lagu ogaado luqadihii ardaydu ay barten intii ay la joogeen daryeelayaashooda ama qoysaskooda. Tan kuma jiraan xarumaha xanaano maalmeedka.

U kala Qeybinta Heerarka Fasalka

Gelitaanka Fasalada	Luqadda Guriga Isbaanishka	Luqadda Guriga oo aan Isbaanish ahayn (Soomaali, Ingiriis, Hmong, iwm.)	La xirii iskuulka Imtixaanada qiimeynta gelitaanka ee loo baahan yahay
PK ilaa rubuca 2 ee fasalka 1 ^{aad}	soo-bandhig aqoonta Ingiriis loogama baahna	soo-bandhig aqoonta Isbaanishka loogama baahna	Maya
rubuc 2aad kadib fasalka 1 ^{aad} iyo fasalada 2-5	Aqoonta afka Isbaanishka ayaa loo baahan yahay.	Waxbarashada Isbaanishka ee hore iyo barashada horumarinta luuqada iyada oo loo marayo kaqeybgalinta iskuulka labada Luuqad, ama iskuulada leh Labada Luuqad immertion-ka.	Haa*

* Kaddib marka la siiyo ardayga imtixaanka qiimeynta loo baahan yahay, maamulayaasha iskuulku waxay u sheegi doonaan qoysaska inay ardaydgu ka qaybqaadan karaan barnaamijka. Qoysaska waxaa loo soo gudbin doona xafiiska diiwaangalinta ardayda si iskuul ku habboon loogu qoro ardaydooda haddii aysan buuxin shuruudaha loo baahan yahay.